# SAKADA

*Tiir ka mida tiirarka islaamka*



*Faarah ahmed abdi*

# Tusmada Buugga

**Hibayn** ....................3
**Mahadnaq**....................4
**Afeef**....................5
Hordhac ....................6
Qeexidda Zakada ....................6
Nusuusta Zakada....................6
Zakada oo ladiido xukumkeeda ....................7
Yaa zakadu kuwaajibtey....................8
Shuruuda nisaabka(ama zaka goyska) ....................9
Cidda Zakada lasiinayo ....................10
Maalka zakada lagadhiibaa waa laba qaybood....................16
**Qeybta kowaad**....................16
  Sakada dallaga beeraha....................16
  Sakada Geed Midhoodka....................17
**Qeybta labaad** ....................18
  Sakada Lacagta....................18
  Zakada Dahabka iyo Fiddada....................18
  Zakada maalka deynta kumaqan ....................19
  Zakada meherka haweenka ....................21
  Zakada ijaarka guryaha....................21
  Zakada ganacsiga ....................21
  Sakada xoolaha....................32
    Geela ....................32
    Lo'da ....................32
    Ariga....................33
**Tixraac**....................34

## Hibayn

Waxaan dhiganahan kooban u hibaynayaa labadayda waalid   hooyo  saafi maxamed siciid iyo aabe Axmed cabdi shibiin

Badana inta ay habeenno tiro badan hurdada u ledi waayeen iyaga oo hammigoodu yahay habka ugu wanaagsan in ay halganka nololeed noogu heenseeyaan waxa leeyahay ilaahay danbigiina ha dhaafo hana idin siiyo naxariis iyo Guul if iyo aakhiraba ,maalinta la qaawan yahay ilaahay carshiga ha u hadheeyo hana ka waraabiyo jannadiisa sarraysa .Aamiin

## Mahadnaq

Marka ugu horreysa ALLE mahad oo dhan u sugnaatay mid aan weligeed maydhmayn ama aan laga masuugayn  ammaana waxa iska leh ergaygiisii ugu dambeeyey ee u adoomihiisa usoo diray si ay  alle u aamminan ugana dhawrsadaan waxaan qirayaa in uu dhambaalkaas habkii ugu dhammaystirnaa u gaadhsiiyey ummadiisa.

Intaa kadib waxan umahadnaqayaa qofkasta akhriyey dhigahan yar isla marka gaarsiiyey waalaalihii cidii uu isleeyahay way ka faa'iideysanayaan.

## Afeef

Buugan wuxu ka hadlaya mawduuc culayskiisa aqooned leh aadna uballaadhan ahna tiir ka mid ah tiirar ka islaamka waxaan ka afeefanaya in buugan yari aanu si dhameystiran u dabooli doonin mawduucan lakiin uu si macquul ah usoo koobay isla markaana indhofur iyo faham fiican ka siinayo qofka u jeelana helid aqoon la xariirta sakada ama sida uu ubixin lahaa.

## Hordhac

Waxaan hadii Allaha awooda sare lihi ogolaado halkaan kudiyaarinayaa Maqaal kusaabsan zakada, taasoo an ugu talagalay cidii doonaysa inay afkooda Hooyo ugaciil baxaan mawduucan maadaama oo ay jiraan dadbadan oo luqada Carabiga an fahmikarin hadana ubaahan inay gutaan waajibaadka Alle saaray dushooda, saas awgeed waxaan Alle karajeynayaa inuu noqdo maqaalkani mid Faa'iido badan utara walaalaha muslimiintaa ee doonaya inay kafaa'iidaystaan

## Qeexidda Zakada

Zakada qeexideedu waa waxa uu bixiyo qofku ee kamida xaqa Alle, Lanasiiyo dadka saboolkaa, waana tiir kamida tiirarka Islaamka ee shanta ah, Waxana lagu xariiriyey sheegitaankeeda salaadda 82 aayadood, sideetan iyo labada meelood markastoo lasheego salaadda waxaa laraaciyaa zakada, Wuxuu Alle kufarad yeelay kitaabkiisa iyo sunada rasuulka nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, Ummadiisuna waa isku waafaqday.

## Nusuusta Zakada

Zakada nusuusta boorinaysa in labixiyo,waxaa kamida ,

1-Suuratul towbah ----Aayadda----103—104
2-Suuratul daariyaat---Aayadda------015-019
3-Suuratul xaj --------Aayadda-------041
4-Suuratul towbah -----Aayadda------081
5-Suuratul baqarah-----Aayadda------276

Nusuusta cabsi gelinaysa zakada oo ladiido waxaa kamida,

1-Suuratul towbah------Aayadda -----034
2-Suuratul Alcimraan----Aayadda------180

xaga axaadiista waxaa kamida xadiiskii dheeraa waana sidan,

Abuu hureera wuxuu werinayaa xadiis kusugan Axmed, Bukhaari iyo Muslim inuu rasuulku nababad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee yiri, (majiro nin haysta kayd oo ankagudin zakada illaa haduujiro waxa lagusoo kululaynayaa naarta jahannama dhexdeeda waxaana lagayeelaa gaballo markaasaa lagu gubaa gabaladii dhinacyadiisa iyo wajigiisa ilaa Alle kala xukumayo adoomihiisa dhexdooda maalin qiyaaskeedu yahay konton kun oo sano markaasaa latusiyaa jidkiisa inuu xaga jannada yahay ama inuu xaga naarta yahay.

majiro qof geel haysta oo anka gudin zakada illaa haduu jiro waxaa loofidiyaa banaan siman asagoo geelii markuu ugu buurnaa lamida ayuu kusoconayaa dushiisa markastoo ay dushiisa dhaafto tan ugudanbaysa waxaa lasoo celinayaa tii uguhoraysay ilaa Alle kala xukumo adoomihiisa dhexdooda maalin qiyaaskeedu yahay konton kun oo sano markaasaa latusiyaa jidkiisa inuu xaga jannada yahay ama inuu xaga naarta yahay.

majiro qof ari haysta oo ankagudin zakada illaa haduujiro waxaa loofidiyaa banaan siman arigii oo markuu ugu buurnaa lamida waxay kulasoconaysaa cidiyaheeda waxayna kudooxaysaa geesa heeda kumana jiraan mid geeslaaban iyo mid an geeso lahayn markastoo ay dushiisa dhaafto tan ugudanbaysa waxaa lasoo celinayaa tii ugu horaysay ilaa Alle kala xukumo adoomihiisa dhexdooda maalin qiyaaskeedu yahay konton kun oo sano lamida kuwaad tirsanaysaan markaasaa latusiyaa jidkiisa inuu xaga jannada yahay ama inuu xaga naarta yahay)-ilaa aakhiral xadiis.

Ibnu cabaas waxa lagaweriyey asaga iyo aabihiisba Allaha karaali noqdee Inuu nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee markuu mucaad ibnu jebel udiray yaman wuxuu kuyiri (waxaad utegeysaa qolo ahlu kitaab ah ee waxaad uguyeertaa shahaadada inaanu Alle maahee ilaah kale jirin iyo inaan ahay rasuulkii Alle, haday kaayeelaan arinkaas ogeysii in Allaha cisada lihi kufarad yeelay dushooda shan salaadood maalin iyo habeen kasta, Hadey kaayeelaan arinkaas ogeysii in Alle kor ahaaye kufarad yeelay korkooda sadaqo maalkooda dhexdiisaa lagana qaadayo kuwooda maal qabeenkaa laguna celinayo kuwooda saboolkaa, haday kaayeelaan arinkaas waxaan ukala digayaa adiga iyo maalkooda midka karaamada badan, kana baq kanladulmiyey ducadiisa wax xijaaba oo udhexeeyaa majiraan Alle iyo ducadiisa)

## Zakada oo ladiido xukumkeeda

Haduu uu diido qofku zakada waajib nimadee-da wuuka baxayaa islaamka, Waxana loodilayaa gaalnimo haduusan ahayn nin dhowaan soo islaamay oo markaas waxa loogu cudur daarayaa jaahil nimadiisa, laakiin haduu diido qofku zakada isagoo aaminsan waajib inay tahay zakadu, kaasi wuu denbaabayaa diidmadiisa darteed laakin kama baxayo islaamka, Waxana xaakimka ama qaadiga dushiisa ah inuu xoog kagaqaado zakada tacsiirna(ganaax) kusameeyo, kamana qaadayo wax kabadan zakada, Laakiin Axmad iyo Shaafici qowlka hore waxay qabaan in lagaqaado zakada iyo maalkiisa barkiis taasoo ciqaab looga dhigayo.

Hadii qabiilo ama qolo awood leh ay diidaan zakada bixinteeda ayagoo rumaysan inay tahay waajib waalala dagaalamayaa ilaa ay dhiibaan zakada, Daliilkuna waa xadiiska kusugan Bukhaari iyo Muslim, Cabdullaahi ibnu Cumar isaga iyo aabiniis Allaha karaali noqdee wuxuu werinayaa inuu nabigu nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee yiri:

(waxalay amray inaan dadka ladagaalamo ilaa ay qiraan Alle maahee inaanu jirin Ilaah kale, Muxamad na inuu yahay rasuulkii Alle, salaadana ay oogaan zakadana ay bixiyaan, hadey sidaas yeelaan waxay iga nabad geliyeen dhiigooda iyo maalkooda xaqa islaamka mooyee , xisaab tooduna waxay utaal Allaah.)

### Yaa zakadu kuwaajibtey

Waxay kuwaajibtay muslim (gaal maya) xor ah (adoon maya) oo haysta maal zaka gaarey (nisaab) noockasta hanoqdo ee noocyada maalka oo zakadu kuwaajibto.

## Zakada maalka ilmaha yar

Qofka yar iyo kanwaalan zakadoodu waxay kuwaajibaysaa inuu kabixiyo maalkooda haduu gaaro nisaab qofka weligooda ama masuuliyadooda haya.

## Qofka deynka qaba

Qofkii haysta maal zako kawaajibtey islamarkaana deyn qaba wuxu kabixinayaa deynta, intasoo hadhay ayuu kazakeynayaa haduu gaaro nisaab hadiise nisaabkii nusqaamo wax zakaa dushiisa lagumalaha sababtoo ah xaaladaas lajoogo waa sabool (faqiir)

## Qofkii dhintay asagoo laguleeyahay zako

Qofka dhintay isagoo dushiisa laguleeyahay zako waxay ku waajibaysaa maalkiisa, waxana lahor marinayaa zakada intaan lasiin dadka deyntakuleh, iyo dadka meydku udardaarmay inmaalka waxlagasiiyo,iyo kuwadhaxalka leh kuwaasoo dhami waxay sugayaan markii zakada lagadhiibo maalka lagadhintay, waxanaloo daliishanayaa xadiiska lagaweriyey ibnu cabaas asaga iyo aabihiisba Allaha karaali noqdee wuxu yiri nin ayaa uyimid rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, markaasuu ninkii yiri hooyaday ayaa dhimatay ayadoo laguleeyahay bilsoonkeed ee makagudaa (makasoomaa) Markaasuu yiri rasuulku nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee (hadii hooyadaa deyn qabto miyaadan kagudeen?) markaasuu ninkii yiri haa waanka bixinlahaa, markaasuu yiri (deynta Alle ayaa xaqmudan inlagudo) waxa weriyey Bukhaari iyo Muslim.

**Shuruuda nisaabka(ama zaka goyska)**

1- Waa inuu ahaadaa zakadu wax kasaa ida qofka xaajadiisa, taasoo anu kamaarmi karin qofku, sida contadiisa, dharkiisa, gurigiisa, gaarigiisa ama gaadiidka uu raacayo markuu meelrabo inuu aado, iyo qalabka shaqada,

2- Waa inuu kasoo wareego sanad (12 bilood) lagasoo bilaabo maalintuu gacanta kudhiay maalkaas gaaraya nisaabka, waana lagama maarmaan sanadkoodhan inuu maalku kaamil yahay ee waxnusqaana aney kudhicin, haduuse nusqaamo sanadka dhexdiisa hadana kaamil noqdo marlabaad waxaloo fiirinayaa markuu kaamil noqday oo markaas ayaa lagasoo bilaabayaa tira sanadeedka.

Imaamu Nawawi wuxu yiri mad habkayaga, mad habka Maaliki, mad habka Axmad, iyo jamhuurta culimada waxay qabaan in looshardiyo maalka zakadu kawaajibto cayntiisa sida dahabka, fiddada,iyo xoolaha soofa, inuu joogto yahay nisaabku sanadka dhamaantiis, hadiise nisaabkii nusqaani kudhacdo daqiiqad sanadka kamida,markaas waxa go' aya tirsigii sanadka ee lootirinaayey maalka, haduu markaas kabacdi kaamil noqdo maalkii markaas ayaa tirsi horle loobilaabayaa.

Abuu xaniifa wuxu yiri: waxa kaliya oo lafiirinayaa sanadka awalkiisa iyo aakhirkiisa oo hadii nisaabkii kaamil yahay markuu sanadku dhamaado wax dhiba malaha nusqaanta kudhacday sanadka dhexdiisa, wuxu yiri xataa haduu qofku haystay laba boqol oo dirham markaasna ayka baaba aan haldirham mooyee intiikale, ama afartan ariya ayuu lahaa markaasaa waxa ugasoo haray halneef oo kaliya sanadka dhexdiisii,markaasuu dhamaadkii sanadka wuxu helay afartankii iyo wax kasiibadan waxa lagarabaa zakada maalkaas oodhan.

**Shardiga niyada zakada marka labixinayo**

Zakadu waa cibaado waxaana loo shardiyaa ansixideeda niyo, niyadaasina waa in qofka zakada bixinayaa u qasdo wajiga Alle, wuxuuna kuraadinayaa zakadaas abaal marinta Alle, wuxuuna kago aaminayaa qalbigiisa inay tahay zakadaasi waajib dushiisa ah, Kitaabka Alle sidakucad suuratul bayinah aayadda –5aad, waxaana kucad in Alle keligiis diinta lookhaalis yeelo
(loobarax tiro) oo ancidna waxba lala wadaajin, Waxa kaloo daliil u ah xadiiska kusugan saxiixul bukhaari, rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee waxa laga weriyey inuu yiri: (Acmaashu waa niyada qofkastaana wuxuu leeyahay wuxuu niyoodo)

**Zakada gudashadeedu waa waqtiga ay waajibto,**

Waxa waajiba zakada inloo bixiyo sidegdega markay waajibto, waxana xaaraam ah in lagadib dhigo bixinteeda markay waajibto, inay bixinteedu suuroobi weydo maahee oo markaas waxa banaan dibudhigid ilaa ay suurowdo bixinteedu, taasna waxaa daliil u ah xadiiska kusugan Bukhaari iyo Axmad, Cuqbata ibnu xaaris wuxuu yiri:

waxaan latukadey salaad casar Rasuulka nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, markuu salaama naqsaday ayuu ukacay si degdega wuxuuna ugalay qaarkamida xaasaskiisa hadana

waasoo baxay markaasuu wuxuu arkay waxa kamuuqda wajiyada saxaabada ee ayla yaabsan yihiin degdegiisa, markaasuu Rasuulku nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee wuxu yiri: (waxan xasuustay anoo salaadda kujira tibran(gabal yar oo dahaba) ee nooyaal oo waxaan nacay inuuku galabaysto ama kubaryo agtayada markaasaan waxan amray in laqaybiyo)

**Qofka zakada bixinaya oo looduceeyo**

Waxaa sunna ah qofka zakada bixinaya inloo duceeyo marka zakada laga qaadanayo sida kucad kitaabka Alle suuratu towba aayada-103-iyo xadiiska uu werinayo Cabdullaahi ibnu abii owfaa wuxu yiri: markii Rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee lookeeno zako wuxuu ahaa mid yiraahda ama dhaha (Allow kusalli dushooda )

Cabdullaahi wuxuu kaloo yiri aabahay ayaa ukeenay sadaqo(macnaa zako) Rasuulka nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, markaasuu yiri: (Allow ahalka abii owfaa dushooda kusalli)waxa weriyey Axmad iyo qayrki. Xadiis kale oo uu weriyey waail ibnu xijrin wuxuu kaweriyey Rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee,nin usoodiray hal geela oo fiican inuu kuyiri: (Allow barakay isaga iyo geeliisaba) Imaamu Shaafici wuxu yiri Waasunno qofka imaamka ah markii lookeeno zako inuu uduceeyo qofka zakada bixinaya kuna yiraahdo- Allaha kaa ajarsiiyo waxaad bixisay, Hanakuu barakeeyo waxaad lahadhay.

## Cidda Zakada lasiinayo

Dadka zakad lasiinayaa waa sideed nooc, Allaah ayaan kucadeeyey qowlkiisa. Suuratu towba aayada 60aad, waxayna kalayihiin sidan soosocota labadan qolo ee uguhoreeya waa:

**1-2 Fuqarada iyo masaakiinta,**

waana kuwo baahan oo an heli karin waxkufilan baahidooda, waxaana kasoo horjeeda aqniyada oo ah dadka hodonkaa ama maalqabeen, kuwaasna horaan ugasoo hadallay qadarka qofku kunoqon karo qani ama maal qabeen, waana inuu haysto qadarkii nisaabka hanti gaadha islamarkaana kasaayida baahidiisa asalkaa isaga iyo caruurtiisa, waana waxlacuno, waxlacabo, dharka laxiranayo, guriga degaanka, gaadiidka laraaco, qalabka shaqada, iyo wixii lamida ee anlaga maarmi karin, hadaba qofkasta oo waaya qaddarkaas ansoo sheegnay waa faqiir ama sabool wuxuna mutaysanayaa inlasiiyo zakada,

Xadiiskii Mucaad ibnu jebel waxaa kamidahaa inuu rasuulku nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee yiri (waxa laga qaadayaa kuwooda hodonkaa, waxana lagu celinayaa kuwooda saboolkaa)

Hadaba kan laga qaadayaa waakan maalqabeenkaa ee haysta maal gaaraya nisaab sidaan soo marnay, kanlagu celinayaana waakan isaga kasoo horjeeda waana kan saboolkaa ee anheli karin waxa uu haysto kan hodonka ahi, manajiro halkaan waxfarqiya oo udhexeeya faqiirka iyo miskiinka markii loo fiirsho xaga baahida iyo xaga mutaysiga zakada, masaakiintu waa qayb kamida fuqarada waxayna leeyihiin tilmaan gaara waxana jira xadiis ayku sugantahay

wax kutusinaya inay masaakiintu yihiin fuqarada, kuwaasoo kadhawr sanaya tuugsiga dadkuna aney garanayn inay baahan yihiin waxaana lagu sheegay aayaddaan soo xusnay, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaan lagaran siday udhawrsoon yihiin ama isu qurxinayaan,

Abii hureera waxaa laga weriyey inuu rasuulkii Alle nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee yiri (miskiinku maaha midka dadka kuwareegaya dushooda oo ay celinayso luqmad ama laba luqmadood, ama timir ama laba timrood, laakiin miskiinku waakaan heli karin qani nimo deeqda, lana garanayn siwaxloogu sadaqaysto dushiisa, isuna taagayn suu dadka wax uweydiisto) waxa weryey bukhaari iyo muslim,

### *Qiyaasta lagasiinayo miskiinka zakada,*

Waxaa lasiinayaa wax kufilan baahidiisa dhexdhexaadkaa ama qadar kasaara sabool nimada oo gaarsiiya wax kufilan, Cumar Ibnu khaddaab ayaa waxa laga weriyaa inuu yiri hadaad bixinaysaan hodonti nimo gaarsiiya, macnaa qofkii waxdhii bayaa hagaarsiiyo qofkuu waxsiinayo heer uu baahida kaboxo

### *Mulkiilaha aan heli karin wax kufilan baahidiisa,*

Ninka haysta maal gaaraya nisaab noocyada maalka kuudoonoba hanoqdee, haduusan toosin karin baahidiisa sababtuna ay tahay caruurtiisoo farabadan, kaasi waa hodon hadii loofiiriyo dhanka maalka oo nisaab gaaraya, waxana kuwaajibaysa maalkiisa zako,waana faqiir hadii loofiiriyo waxa uu haysto ee ankufilayn baahidiisa, waxana lasiinayaa zakada sida faqiirka,

Imaamu nawawi wuxuu yiri ninkii leh hanti maguurtaa (sida beeraha iyo guryaha magaalo) oo waxa kasoo galaa kayaraado baahidiisa kaasi waa sabool waxaana lagasiinayaa zakada wax udhamays tira baahidiisa.

### **3 -- Dadka zakada kashaqeeya (caamiliin)**

qaybta sadexaad ee lasoo dhowaynayo waakuwa imaamka muslimiintu ama wakiil kiisu udiray inay kashaqeeyaan zakada soo ururinteeda, kanasoo qaadaan dadka maal qabeenkaa, waxaana kuwaas soogelaya kuwa xafidaya iyo kuwa raacaya haday xoolanool yihiin, iyo kuwa liisgaraynaya oo kuqoraya diiwaanada,

waxaana waajiba inay muslimiinta kamid yihiin waana inayan ahayn kuwii sadaqadu kaxaaraam sanayd ee kamida xigtada ama qaraabada rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, waana Ilma haashim iyo Ilma cabdi mudalib,

waxa lagaweriyey Mudalib Ibnu Rabiicata iyo Fadli ibnu cabaas inay aadeen Rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee,markaasaa waxaa lahadlay midkood oo yiri; rasuulkii Allow waxaanu kuugu nimid inaad noo amarto zakooyinkaan oo uu nagasoo gaaro waxa dadka kasoo gaaraya ee waxtar ah, markaasuu yiri (sadaqadu umahaboona Muxamad iyo Aalu muxamad, waxkalena maahee ayadu waa wasahkdii dadka)

**4 --- kuwa quluub tooda lasoo dumayo,(mu alafatulquluub)**

Qolada afraad ee zakada lasiinayo waakoox ladoonayo inlasoo dhoweeyo quluubtooda iyo inlagusoo daro islaamka ama lagusugo islaamka dushiisa, Islaam nimadooda oo daciifa awgeed, ama waakoox shartooda looga difaacayo mislimiinta, fuqahadu waxay ukalaqaadeen muslimiin iyo gaalo, Sigaarana muslimiinta waxay ukalasaareen afar qaybood,

1. -qolada kowaad waa odayaasha iyo duqeyda muslimiinta ah sida kuwii Abuu bakar Allaha karaali nodee siiyey, waxaana kamid ahaa cadiyi ibnu xaatim iyo zibriqaan ibnu badrin, waxayna ahaayeen kuwo islaamkoodu fiicnaa wuxuna usiiyey booskay kajoogaan qoladooda,

2. -qolada labaad waa muslimiinta iimaankoodu daciifka yahay duqeydooda, cidda dhexdeedana la adeecsan yahay waxsiintoodana lagu rajeynayo inay kusugnaadaan islaamka, iimaan kooduna xoogaysto, sida kuwii nabigu siiyey nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee siismo balaaran kasiiyey qanimooyinkii hawaasin lagahelay, waxana kami ahaa ragii layska daayey ee reer maka markii lafurtay kuwaasoo markii dambe islaamay, waxaana kamid ahaa ku munaafiqa iyo ku iimaankiisu daciifyahay intoodii badnaydna markaas kadib way kusugnaadeen islaamka,

3. -qolada sadexaad waa kuwalasoo dhoweynayo ee qolo muslimiinta furinta xuduuda magalooyinka cadowga jooga kamida, waxaana loosiinayaa difaacooda muslimiinta ay kadifaacayaan goortay soo weeraraan cadowgu,

4. -qolada afraad ee muslimiinta katirsani waa duqey loobaahan yahay inay zakada kasoo qaadaan dad anbixinayn amarkooda iyo saamaayntooda la aantii, hadii ankuwaas loo adeegasan waxay noqonaysaa indagaal iyo xoog lagu qaado markaasna waxaa dhici kara dhibaato, saas awgeed ayaa ladoortay inlasoo dhoweeyo odayaasha si ay ugarab istaagaan kaalmada dawladda, taasaana labada dhib fudud,

Gaaladiina waxaa lookala qaaday laba qaybood oo kala ah sidan,

1-waxa kamida midlaga rajeynayo soodhoweyn taas iyo waxsiintaas inuu islaamo, sidii safwaan ibnu ubayata, kaasoo nabigu nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee uu siiyey amaan (nabadgelyo) maalintii maka lafurtay wuxuuna usugey (ukaadsadey) afar bilood si uu amarkiisa ugafiirsado naftiisana wax udoorto wuxuuna siiyey geel fara badan oo rimman, markaasuu yiri Allaan kudhaar taye nabigu waa Isiiyey asagoo an dadka ugu nebcahay kamana suulin inuu isiinayo ilaa uu Noqday kaan dadka ugujeclahay,

2-qolada labaad ee gaaladu waa kanlaga cabsanayo shartiisa siisma diisana lagarajey naayo inuu dhibtiisa reebto,(gaabsado) Ibnu cabaas wuxuu yiri dadku waxay ahaayeen kuwo uyimaada nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, markaas haduu siiyo waxay amaani jireen islaamka waxayna oran jireen tani waadiin wanaagsan hadii loodiidana wey caayayeen waana ceebaynayeen, waxaana kamid ahaa ragaas abuu Sufyaan ibnu xarbi, Aqrac ibnu xaabisin, Cuyeynata ibnu xisnin, midkastoo kamida wuxuu siiyey nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee boqol geela.

Axmad iyo muslim waxay anas kawerinayaan inuu yiri anas, nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, hadii laguweydiisto islaamka shey waa bixin jirey, waxaa uyimid nin markaasuu weydiistay markaasuu wuxuu amray inlasiiyo ari farabadan ee daaqaya laba buurood dhexdood ee kamida xoolihii zakada, markaasuu kulaabtay qoladiisii oo kuyiri war qoom yohow islaamka qaata, Muxamad wuxuu bixinayaa bixin nimaan faqri kabaqayn oo kale.

**5 - Adoomaha xorayntooda, (wafiriqaabi)**

waxaa lagu jamcinayaa halkaan labanooc oo adoomuhu ukala baxaan, waxayna kalayihiin kuwo lakitaabeeyey-macnaa waxa seyidkii lahaa kula heshiiyey haduu keeno lacagta uu kula heshiiyey inuu xornoqon doono markuu keeno lacagtaas.

Kankalena waa mid lahaysto oo hadii lagasoo gado cida adoonsanaysa markaasna laxoreeyo saasna uu markaas kaga boxo adoonimadii, Labadaas qoloba waxaa lagu xorayn karaa zakada sideeda qaybood qayb kamida, kanlagu xiray inuu keeno lacag markaasna xoroobo waxa loogu kaalmaynayaa zakada siduu ugabixi lahaa adoonimada,waxaa kaloo zakada lagusoo gadayaa kuwakale oo la adoonsanayo markaasna waa laxoraynayaa.

**6-kuwa deymoobey (Alqaarimuuna)**

qoladan lixaad ee zakada lasiinayaa waa kuwo deymoobey, karina waayey inay iskadhiibaan deynta, waxayna ukala qaybsamaan sidan, mid deyngalay ama damaano qaaday deyn inuu cidkale kadhiibayo ee markaas isaga lagarabo, siduu kubixin lahaana maalkiisii kudhameeyey, kuwaasoodhan waxay kaqaadanayaan zakada deymohooda,

qubeysata ibnu mukhaariqin alhilaaliyi waxa lagaweriyey inuu yiri waxaan qaaday deyn an dad dhexdood kukala xalinayo saan dhibaato udhicin markaas ayaan waxan utegey rasuulkii Alle nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, anigoo waxwarsanaya, markaasuu yiri (joog ilaasadaqo nooga timaado oo markaas ankuu amarno sadaqadaas) rasuulku nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, markaasuu sida laweriyey hadana yiri: (qubeysow baryadu xalaal uma aha sadex midkood waxan ahayn, nin xamaala qaaday oo markaas ay uxalaal noqotay baryadii ilaa uuhelo markaana uu kajoogsado)

culimadu waxay dheheen xumaaladu waa wixii qofku qaado ee kulaasimaysa naftiisa inuu bixiyo asagoo kukala xalinaya dad is haysta dhexdooda. Carabtu waxay ahaayeen markii dhexdooda fidno kadhacdo qofkood ayaa isutaagi jirey suu ugahortago dhibkaas isagoo kudhiibaya maal wuxuu helikaro, ilaa fidnadaasi kadegto, waxayna ahaayeen kuwo markay ogaadaan in midkood qaaday deyn uu dadkukala saarayo waxay uladegdegi jireen inay kucaawiyaan oo aysiiyaan wax

naftiisu deynta kaga baxdo, haduu ninku arinkaas dartii wax uwarsado dadka kuma ceebaynjirin, laakiin waxay u arkayeen faan iyo raganimo, shardina maaha qofkii galay maslaxadaas oo kale inuu maalkiisu dhamaado laakiin isagoo heli kara hanti gaadha waxa uu galay ayuu hadana zakada kaqaadan karaa wuxuu kukala maslaxayo dadka dhexdooda iyo dhibaato laysku dhici lahaa daminteed.

**7- Jidka Alle (Fii sabiilillaahi)**

Jamhuurat culumadu waxay mareen inlooga jeedo halkaan duulaanka lagu duulayo jidka Alle oo ah Jihaadka,iyo in saamigan lasiinayo kuwa udiyaarkaa duulaanka jihaadka, kuwaasoo an mushahara kulahayn dawlada, kuwaas noocaas ah ayaa lasiinayaa saamiga 7aad ee zakada kamida, farqina makala laha inay hodon yihiin iyo inay sabool yihiin.

**8 - Musaafirka (Ibnu sabiil)**

Culumadu waxay isku waafaqeen nin musaafir beledkiisii ama magaaladiisii kago'ay ama kabaxay lasiinayo zakada wuxuu kugaaro dantiisa ama ujeedadiisa,waana hadii aaney usahlanayn wax maalkiisii kamida inuu helikaro sida xawaalada oo kale,waxaana loosiinayaa ayadoo loofiirinayo faqrigiisan kuyimid ama kudhacay, waxayna culumadu ushardiyeen ama kuxireen inuu musaafirka safarkiisu yahay daaco(mid sharcigu amray inloo safro) Ama waa inuusan ahayn macsiyo (mid denbi lagala kulmaayo oo sharcigu reebay inloo safro)

Culumadu waxay isku khilaafeen safarka mubaaxa ah (iska banaan) malasii nayaa zakada ?

Shaaficiyadu waxay ukala qaadeen musaafirka labo qaybood,

1. - mid kabilaabaya safarkiisa magaaladuu kunegaa ama kusugnaa haduu doono wadankiisaba hanoqdee,

2. - iyo musaafir qariiba oo kategey magaaladiisii, waxay dheheen labaduba xaqbay uleeyihiin in zakada wax lagasiiyo, xataa hadii lahelo qof amaah ama deyn siinaya, isaguna uu kahelayo magaaladiisii hanti uu isaga bixin karo deyntaas.

Maaliki iyo Axmad waxay qabaan musaafirka mutaystay zakada in lasiiyo waa midka safarka kudhexjira ee socdaalka ah, laakiin kan bilaabaya lamasiin karo. Waxay kaloo qabaan inaan lasiinayn zakada qofka heli kara cid siinaysa amaah ama deyn isagoo heli kara hanti utaal magaaladiisa taasoo deynta uu isaga bixin kar, laakiin haduusan heli karin cid amaah siisa ama aanu haysan hanti kadambaysa oo deyntaas kabixin karta markaas waa lasiinayaa zakada.

## Zakada oo loo qaybiyo dhamaan cida mutaysatay ama qaar kamida

Noocyaasha sideedaa ee zakada mutaystay inlasiiyo ee aayadda lagu sheegay Fuqahadu waa isku khilaafeen sidii loogu qaybin lahaa sakada,

Shaafici iyo ragiisu waxay dheheen haduu kan zakada qaybinayaa yahay kii maalka iskalahaa ama wakiilkiisii waxa meesha kabaxaya halnooc oo ah caamiliin ama kuwii kashaqay nayey zakada, waxaana markaas waajibaya inloo qaybiyo todobada soo hartay ee sinfi ama nooc kaad tiraahdaba, haday yihiin kuwa laheli karo, hadii kalena intii laheli karo ayaa lasiinayaa ee nooc yadaas kamida, mana haboona in nooc kamida lagatago isagoo jooga ama lahelayo, haduu katago waxa laga rabaa inuu bixiyo qaybtoodii.

Ibraahimu nakhaci wuxuu yiri haduu maalku badan yahay oo wada gaari karo noocyadaas sideedaa oodhan wuu uqaybinayaa, haduuse yaryahay maalku waxa banaan inuu siiyo halqolo ama nooc kamida kuwa mutaystay zakada in lasiiyo.

Axmad ibnu xanbali wuxu yiri, inuu wadagaarsiiyo ayaa mudnaan badan, haduuse qolo kamida siiyo waaka gudaysaa zakadii oo maburayso. Maaliki wuxu yiri, wuuku dadaalayaa ama hakudadaalo inuu siiyo hadba qolada ugu baahi badan, haduu arko qolada fuqaradaayi inay baahi badan yihiin sanadkan ayaguu kuhor marinayaa, haduu arko sanadka danbe musaafiriintu inaybaahi badanyihiin ayaguu uwareejinayaa inuusiiyo,zakada.

Xanafiyada iyo Sufyaanu sowri waxay dheheen isagaa khiyaar uleh kan zakada dhiibayaa oo wuxuu siin karaa sideeda nooc kuudoono. Intaasoo waji ayaa fuqahadu kala mareen sida sawaabkaana Alle ayaa og.

**Maalka zakada lagadhiibaa waa laba qaybood**

1- Mid waanooc naf ahaantiisa u kordha sida xabuubka (bariiska iyo mesangada iyo wixii lamid ah) simaarta (miraha sida timirta cinabka iyo wixii lamid ah), noocaas waxay zakadu kuwaajibtaa markii lagoosto ee gacanta lagudhigo wixii beeraha kasoo go ay,

Qaybta labaad waa wixii qaabganacsi loodiyaariyo inay kordhaan sida Dirhamka, Diinaarka, Hantida ganacsiga(curuudul tijaarah) iyo xoolaha soodaaqa cawska banaanka, kuwaasna waxa loofiiirinayaa sanad inuu kasoo wareego, markaas ayaa lagadhiibayaa zakada, saasna waxa yiri fuqahada dhamaantood, waxaad kaheli kadhaa Majmuuca uu leeyahay imaamul Nawawi

**Qeybta kowaad**

## Sakada dallaga beeraha

Dallaga beeraha ay sakadu ku waajibtay waa Hadhuudhka ,Qamadiga ,Galleyda oo degaanada qeybtood loo yaqaan arabikhi ama xasiid ,Bariiska iyo wixi la mid ah

Si uu qofku sako uga bixiyo dallagii beertiisa uga so go’ay waa in la helo sharuudahan

Wa In dallaagsi yahay mid loo beeray in dadku raashin ahaan u isticmaalan

Waa in uu yahay dallag la keydsan karo

Waa In uu dallagaasi gaadho heerkii ku noqonayay sako-gal

Hadaba nisaabkooda ama inta ay sako-gal kunoqon karaan waa 5wusqi oo u dhiganta 1600 rodol ciraaqi ah miisaan ahaan udhiganta 750 kiilo garam

Waayo halkii wusqi waa 60 saac Halkii saacna waa 2.5KG

5x60 = 300

300x2.5 =750

Mesagada ku goday ama hadhuudhka kuu go’ay markay gaadho 750 kiilo garaam wayaa sako laga rabaa

Waxaana laga bixin Hadii uu roobku baxday ama daad waxad bixin markaad toban uqeybiso ayaad halka bixin

750x10%= 75

750 kiilo waxaad ka bixin 75 kiilo

Hadii aad Aalad ku waraabisana ama mashiin ama gacantaada waxad midii aan soo maray nuskeed

750/10 =75
75/2 =37.5
Markan 37.5 kiilogaraam ayaad bixin

## Sakada Geed Midhoodka

Geedaha midhoodka sakadu ku waajibtay waa geedka cinabka iyo geedka timirta

Si uu qofku sako uga bixiyo midhihii usoo goay timirtii iyo cinabkii uu beeray waa in la helo shuruudahani

Waa in uu qofku islaam yahay

Wa in uu xor yahay

Waa in midhahani uu u haysto lahaansho dhameystiran

Waa in midhaha gadhaan heerkii ay ku noqonaayen sako-gal

Geed midhoodku wuxu la mid yahay dalag beeraha dhinac sako gal iyo xadiga sakada laga bixinayo oo aynu kagasoo hadalnay mawduuci ka horeeyey

## Qeybta labaad

## Sakada Lacagta

Lacagta ay sakadu ku waajibtay waxay ukala baxda labo qeybood kan kowaad waa dahabka oo waagii hore loo yaqaanay ama uu caan ku ahaa Dinaar kan labaad qalinka isna waagii hore waxa loo yaqaanay Dirham.

Lacagta waraaqda ee iminka dadku isticmaalan si loogu bixiyo sako waa inay gaadho xaddi goyn kara 85gr oo Dahab ah ay ka baxayso sako 2.5% ama boqolkiiba labo iyo bar noqonaysa

Hadii markii aad lacagtaada xisaabisay ay noqotay in goyn karta 85 gr oo Dahab ah iyo wax ka badanba waxaad wadarta lacagtaada ku dhufanaysaa 0.025 (2.5%) kadib inta kusoo baxda ayaa noqonaysa sakadii ku waajibtay lacagtaada

**Tusaale**

Qof haysta 5000 oo dollar sako intee le'eg ayaa lagu leeyahay ?

Marka hore waa in la hubiyaa in 5000 oo dollar ay goyn karto 85 gr oo dahab ah Hadii ay goyn karto ama xadi ka badan 85 gr ay goyn karto waxaa la samaynayaa sidan

5000*0.025 = $125

Markaa qofkaasi lacagtiisa waxaa sakadii ku jawaabtay noqonaysa 125 dollar

### Zakada Dahabka iyo Fiddada

waajibkeedu wuxuu kusoo arooray zakada dahabka iyo fiddada hadalka Alle- suuratu towba aayadaha 34-35 waana waajib zakadoodu labada, waana iskumid lacag hadii laga sameeyo inta ladhalaaliyo, hadiilatumo iyo haduu yahay mid ceeriinba, markuu gaaro qadarka mulkigu oo midkastoo labadaas kamida nisaab ama zaka goys,kanasoo wareego dushiisa sanad, mulkigaasuna yahay mid laga saaray deyntii iyo wixii xaajada asaligaa (sida masaariifta reerka iyo wixii lamida )

Nisaab ama zakagoyska dahabka iyo qaddarka kawaajibaya

waxba laguma laha dahabka ilaa uu gaaro 20 diinaar haduuse gaaro 20 diinaar kanasoo wareego sanad waxaa laga bixinayaa nusdiinaar tusaale 20 / 10 =2 / 4=0.5

wixii kasiyaada labaatankana qaacidadaas ayaa lamarinayaa tusaale kale hadaan bixino 200/10=20-:-4=5 / daliilna waxaa u ah xadiiskan Cali wuxuu kaweriyey rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee inuu yiri: (waxba dushaada maaha ilaa ay kuu ahaato labaatan diinaar.hadey kuu ahaato labaatan diinaar oo kasoo wareegtey sanad waxaa lagu leeyahay diinaar barkiis,maalna zako laguma laha ilaa uu kasoo wareega sanad) waxaa weriyey axmad ,abuudaauud,iyo beyhaqi bukhaarina waasaxiix yeelay.

nisaabka ama zakagoyska fiddada iyo qadarka kawaajibaya fiddada laguma laha waxba ilaa ay gaadho laba boqol oo dirham hadeyse gaadho laba boqol oo dirham waxaa lagu leeyahay toban meelood meel kamida rubuceed tusaale 200/10=20/4=5 wixii kasiyaadana saasaa loo xisaabinayaa, daliilkuna waa xadiiskan ,Cali wuxuu kaweriyey rasuulka nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee inuu yiri:

(waan idiin cafiyey fardihii iyo addoomihii ee keena sadaqada lacagta)ilaa aakhiral xadiis waxaa weriyey asxaabu sunan,

**Dahab iyo fido malaysu geyn karaa?**

qofkii hela waxkayar nisaab ama zakagoys oo dahaba ama fidda ah uma geyn karo midkood midka kale si ay isugu noqdaan qaddarkii zakada laga rabey maxaayeelay waa kala laba jinsi looma geyn karo midkood midka labaad , waa sida Lo, iyo Ari. haday gacantiisa kujidho 199 dirham iyo 19 diinaar dushiisa zako maaha

## Zakada maalka deynta kumaqan

Zakad deyta waalaba midkoo,

1-inuu yahay midlagu kalsoon yahay inuu dhiibo maalkaas

2- ama inuuyahay mid cayr ah an xoola haysan

1-haduu yahay mid lagu kalsoon yahay ee dhiibaya deynta culumadu waxay kadheheen dhawr qawl

1*Qawlka hore waxay kadheheen ninka hantida iskaleh waxaa lagu leeyahay zakada xoolaha deynta kumaqan saas waxaa qaba Cali, Sowriyi, abiisowrin, Xanafiyada, iyo Xanaabilada“

2*Qawlka labaad waxay dheheen waaku qasban yahay inuu dhiibo zakada ilaa waqtigaas ay waajibtey xataa hadii gacantiisa weli aney soogelin deyntu maxaa yeelay wuxuu awoodaa inuu qaato iyo inuu isticmaalo saasna waxaa qaba Cusmaan, Ibnu cumar, Jaabir, Daauus,Nakhaci, Xasan, Suhriyi, Qataadah, iyo Shaafici

3*Qawlka sadexaad waxay dheheen wax zakaa lagama rabo sababtu waa xoola antarmayn ee ningacanttis kujira, saasna waxaa qaba cigramata

4*Qawlka afraad waxay dheheen waxa uuka zakeynayaa markii uu gacantiisa soogalo maalku wuxuuna kabixinayaa hal sano oo keliya zakadeed saasna waxa qaba saciid ibnu musayib, iyo cadaa ibnu abii rabaaxa, intaasi waa waxay kadheheen culumadu ninka lagu kalsoon yahay ee dhiibaya deynta

balkan cayrta ahna an eegno, haduu yahay mid cayra ama mid madax adag ama mid laablaab badan waxay dheheen maalkaas kuma waajibeyso zako saasna waxaa qaba qataadah, Isxaaq, iyo xanfiyada sababtuna waxay dheheen waa xoola an lagu intifaacayn

Qawlkalena waxay dheheen wuuka zakeynayaa markuu gacanta kudhigo sanadihii soo dhaafay dhamaantood, saasna waxaa qaba Sowriyi, iyo abii cubeyd

Qawlkalena waxay dheheen wuuka zakeynayaa markuu gacanta kudhigo halsano oo keliya, saasna waxa qaba Cumar ibnu cabdulcasiis,xasan, Leysi, Owsaaci, Maaliki

Intaasina waa dadkaan lagu kalsoonayn in lagahelo deynta ay qabaan iyo wixii culumadu kadheheen“ Haweentu waxay isku qurxiso oo dahabka iyo fiddada ah Culumadu waa isku khilaafeen zakadiisa, abuu xaniifa iyo ibnu xasmi waxay qabaan waa waajib zakadiisu waxay haweenku isku qurxinayaan oo dahab iyo fiddo ah haduu gaaro nisaab ama zaka goys,waxayna udaliishadeen xadiiska cumar ibnu shucayb kaweriyey aabihii, aabuhuna kasii weriyey awowgiis, wuxu yiri waxaa nabiga uyimid nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee laba haweena oo gacmohooda ugu jiraan jijimo dahaba, markaas ayuu yiri (majece shihiin in Alle jijimo idiinka dhigo maalinta qiyaame jijimo naar ah ) waxay dheheen maya markaasuu yiri: (kadhiiba xaqa kan gacmihiina kujira )

Asmaa bintu yasiid waxaa laga weriyey inay tiri waxaanu usoo gallay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, aniga iyo habaryartay anagoo qabna jijimo, markasuu yiri: (mabixisaan zakadiisa ) waxaanu niri maya, markaas ayuu yiri: (miyaydaan kabaqayn in Alle idiinkujijimeeyo jijimo naar ah, kadhiiba zakadiisa) heytami wuxuu yiri axmad ayaa weriyey sanadkiisuna waa xasan ;

Caisha waxaa laga weriyey inay tiri waxaa iisoo galay rasuulka nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee, wuxuuna gacan tayda ku arkay faraatiyaal fiddo ah markaasuu igu yiri (caishay waamaxay waxani ) markaasaan iri waxaan ugu talagalay inaan kaa isugu qurxiyo adiga rasuul Allow, markaas ayuu yiri (makadhiibtaa zakada) markaasaan iri maya ama waxan iri wixii Alle doonay, markaasuu yiri: (isagaa kuugu filan naar)waxa weriyey abuu daauud, daaru qudni, iyo beyhaqi, Sadexda imaam oo kale waxay kutageen inaayan zako lahayn waxa haweenku isku qurxiyaan ee dahab iyo fiddo ah intuu doonaba hagaaree,

Beyhaqi wuxuu weriyey in laweydiiyey jaabir ibnu cabdullaahi waxyaalaha haweenku isku qurxiyaan zako maleeyahay? wuxu yiri maya, markaasaa waxaa layiri kawaran haduu gaaro kun diinaar, markaasuu yiri haba kabad Naado haduudoono,

Beyhaqi wuxuu weriyey asmaa bintu abii bakar inay kuqurxin jirtey gabdheheeda dahab gaaraya 50,000 kamana zakayn jirin, Kitaabka layiraahdo muwadda waxaa kusugan caisha inay ahayd mid xanaa naysa gabdho walaalkeed dhalay ee agoomaa waxayna lahaayeen dahab ay isku qurxiyaan kamana zakayn jirin caisho,

Waxa kaloo muwadda kusugan Cabdullaahi ibnu Cumar wuxuu ahaa mid kuqurxiya gabdhihiisa iyo jaariyadihiisa dahab kamana zakayn, Khadaabi wuxuu yiri sida daahirka kucad kitaabka Alle suuratu towbah aayadaha 34-35 waxay umarag noqonayaan cida tiri waa waajib in laga zakeeyo haweenku waxay isku qurxinayaan, Aaraadan aynusoo marrayna waa xoojinayaan,  Nuxurkii oo kooban sida dadaalka badani waa in laga bixiyo zakada waxay haweenku xiranayaan oo dahab iyo fiddo ah.

## Zakada meherka haweenka

Abuu xaniifa wuxuu qabaa inaan wax zakaa laga rabin meherka haweenka ilaa ay gacanta kudhigto wax zaka ahi kuma waajibayso ilaa lasiiyo markaasna ay kutasarufto, islamarkaasna waxaa shardi ah inuu gaaro maalkaasi nisab Ama zaka goys, shardiga kalena waa inuu kasoo wareego sanad, laakiin haday xoola kale oo gaaraya nisaab ay horay uhaysatay markaas looma fiiri nayo sanad ee waxa laga zakey nayaa markii xoolaha hore sanad udhamaado

Tusaale waxay haysatay kun dollar oo soogalay gacanteeda Jan.2000, markasey waxay kaloo heshay meherkeedii Jun,2000, waxaa sanadku ugu dhamaa nayaa Dec, 2000 saas ayaa loo xisaabinayaa hanti kasta oo kusoo gasha adoo haystey hanti hore oo gaareysa nisaab, Shaafici wuxuu qabaa haweenta waa kulaasim (qasab) zakada meherkeedu xataa haday tahay midaan weli laguri geysan lanataaba marhadii sanad kasoo wareego waa inay bixiso, saas wuxuu kawadaa haweentu nus bay leedahay meherka hadaan weli lataaban oo nikaax keliyi kudhacay saas ayadoo ah waxa laga rabaa labada qayboodba inay ka zakayso waa qawlka shaafici,

Xanaabiladu waxay dheheen haweenta meherkeedu waa deyn iyada kamaqan xukunkiisuna waa haduu yahay ninku mid maal qabeen ah waaku Waajib zakadiisu maalka inay bixiso, markay gacanta kudhigtona waxay kazakay naysaa sanadihii soo dhaafay,

## Zakada ijaarka guryaha

Abuu xaniifa iyo maalik waxay qabaan ninka ijaartey guriga xaq umalaha ijaarkiisa ilaa mudadii ijaaradu dhamaato, waxay dheheen anagoo taas waxku dhisayna ninkii guri ijaarta kumawaajibin ijaaradaas zakadeedu ilaa uu gacanta kudhigo markaasna sanad kasoo wareego, isla markaana gaadho nisaab Ama zaka goys,

Xanaabiladu waxay qabaan ninkii guri ijaarta wuxuu mulkinayaa ijaaradiisa waqtiga heshiisku dhacay, xataa haduusan waxba qaadan waxa lagu tirinayaa maalkaas mulkigiisa, saas awgeed waxaa kuwaajibaya ijaaradiisa zako, waa hadii ay gaadho nisaabkii ama qadarkii zakadu kawaajibaysey, isla markaasna kasoo wareego mudodhan sanad,

## Zakada ganacsiga

Jamhuurta culumada, saxaabada, taabiciinta iyo fuqahadii kadamaysay dhamaan toodu waxay kutageen inay waajib tahay zakada hantida ganacsigu.

waxaana daliil u ah xadiiska ay werinayaan abuu daauud iyo beyhaqi, waxa laga weriyey samurata ibnu jundub inuu yiri, Nabigu nabad gelyo iyo naxa riis korkiisa hanoqotee wuxuu ahaa kiina amra inaanu kabixino zakada maalka aanu udiyaarinay ganacsiga: Daliilka labaad waa xadiiska ay werinayaan daaruqudni iyo beyhaqi :

Abii Darri ayaa kaweriyey Nabiga nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa hanoqotee Inuu yiri: (geelu wuxuu leeyahay zako ariguna wuxuu leeyaya zako lo’duna waxay leedahay zako alaab

tuna waxay leedahay zako) Xadiis kale waxaa werinaya Shaafici, Axmad, Abucubeydin, Daaruqudni, Beyhaqi, iyo Cabdurisaaq inuu kaweriyey Camru ibnu xamaasin aabihiis oo xamaas ah wuxu yiri,waxaan ahaa mid iibiya hargo ama maqaar hadaan ahay xamaas markaas ayaa waxaa isoo maray Cumar ibnu khadaab Allaha karali noqdee markaasuu yiri: kabixi maalkaaga zakada , markaasaan ku iri amiirkii mu'miniintow waxaani waa hargo, markaasuu yiri: qiimay, macnaa maqaaradan lacagtooda xisaabi oo markaas kabixi zakada,

Waxaa kusugan kitaabka Mannaar, culumada diinta jamhuurtoodu waxay leeyihiin waa waajib zakada hantida ganacsigu, Intaasi waa adiladii iyo Aaraadii kutusinaysey zakada hantida ganacsiga, sababtoo ah xoolahaagu waxay kuwareegaan lacag iyo badeeco lacagtii kujidho, saas awgeed waa inlaqiimeeyo markasta oo sanad kasoo wareego Siloo ogaado zakada kabaxaysa, taasna horaan usoo tusaalaynay,

**Goormay noqotaa hantidu ganacsi ama tijaaro**

Wuxuu yiri ninkii kitaabka Muqniga qoray ganacsi manoqonayso hantidu ilaa laba shardi laga helo,

1-waa inuu ficil kusoo galaa maalku sida beyca, meherka, hibo lasiiyey maal waalidku u dardaarmay iyo kasbasho banaan oo wax lagu kasbado,

2-waa inuu niyoodo ganacsi markuu mulkinayo maalka, haduusan uniyoon ganacsi manoqonayo tijaaro maalkaasu ee wuxuu noqonayaa badeeco kayda, qofkii hantiya tijaaro gaaraysa nisaab kanasoo wareegto sanad wuxuu qiimey nayaa sanadka dhamaadkiisa markaasuu kabixi nayaa zakada, qaabka looga dhiibayaana waa sidan, hantidaada markaad xisaabto waxa kuusoo baxa uqaybi 40 meelood waxaad kabixisaa markaas meelkamida waxa kuu soo haray waa 39 meelood, tusaale hadaan kabixino 1000$ uqaybi 40 =25 waxa kaabaxay waa shan iyo labaatankaas, sidaas ayuu kusameynayaa taajirku maalkiisa sanad kasta ee soo wareega haduu Alle kabaqayo Side Loo Sakeeyaa Ganacsigga? Ganacsi Shuraakadda Ah Ama Ka Gaarka Loo Leeyahay Ba?

**Waa maxay Ganacsi?**

Ganacsigu waa Hantidda aad soo iibsato ama aad sii iibiyso adoo niyadda ku haya inaad faa'iido ka hesho ama ad ka dhaliso, ha ahaato hanti aad soo dhoofsato, ama aad sii dhoofiso, ama dhismayaal ad ka ganacsato ah (Construction), ama tu Beereed ba.Dhamaan shaqooyinka iyo kuwo kale oo badan ayaa loo yaqaan Ganacsi. Ok, Haddaba Hantidda ama Ganacsigga laba ayaynu u kala qaadaynaa; marka aynu doonayno in anynu ka sakayno Hantideena: a) Hanti ma-guurto ah (Fixed Asset)

b) Hanti Guurto ah (Current Asset)

a) Hanti ma-guurto ah (Fixed Asset)

Sideedaba, Hantida ma-guurtada ah wax sako ah laguma laha sida ku cadd axaadiiskan saxeexa ah.

(Rasuulku (SCW) wuxuu ina faray inaynu ka sakayno wixii bayc ama iib loogu tallo galay)

**Laakin intaa ka hor waa maxay Hanti ma-guurto ahi?**

Hanti ma-guurto ah waxa looga jeeda ama ay tahayba tusaale ahaan waxyaalahan hoos ku xusan:

- Gurriga aad gasho: gurigaas oo aan waxa ganacsi ah aanad uga jeedin
- Gaadhigga aad si shakhsi ah iskaga wadato ama aad u isitcmaasho adoon wax ganacsi ah uga jeedin.
- Company (Shirkaddi) wixii Fixed Asset ah ee uu leeyahay ama ya leedahay.
- Qofka Taxi-laha ah Kama sakanayo gaadhiga laftiisa.
- Qalabka beerta laga shaqaynayo (mishinada) ee beerta dhex yaal.
- IWM (etc.)

Inta ayanan u galin qaybaha hantidda ay u kala saarnay, waxaa jira shuruudo u yaal maalka la sakaynayo in lahado si loo sakeeyo, bal aynu tilmaano shuruudaha loo baahan yahay inuu yeshu maalka la sakaynayaa waa sidan hoos ku xusan.

**Shuruudaha looga baahan yahay Maalka la Sakaynayo:[1]**

1. Hantiiluhu waa inuu mulkiyad dhamaystiran u leeyaay maalkiisa, kuna tagri-fali karaa, si uu ugu wareejin karo ama u bixin karo maalka sako ahaan uga go’a.
2. Waa inu uu yahay maalku maal kobcaya, koboc dhaba (نماء فعليا), iyo koboc farsamo (نماء حكميا), tusaale hantidda kaydsan, si farsamo ayay u kobocdaa ama u naaqustaa Sarifka oo kale.
3. Intaan la sakayn in laga jaro maalka dhamaan wixii quutal daruuri ah (biil ama masaarif).
4. In dhamaan dayntii lagagu lahaa iska jarto, oo u noqdo maal dayn ka saafiya, marka laga reebo maal-galinta wakhtiga dheer.
5. In maalku gaadho Nisaabkii lagaga sakaynayay (85gram oo dahab ah).
6. In maalka sanad kasoo wareego, marka laga reebo Dallaga, Macdanta iyo Rukaas.
7. Inuu maalku xalaal noqdo.

**Maxaa laga jarayaa ama la goynayaa Maalka intaan la Sakayn?**

1. Duugawga (Depreciation): waa hanti laga jaro faa’iidada shirkada, si logu dabaloolo kharashkii lagu abuuray ama lagu dhisay hantidda ma guurtadda ah.
2. Hantidda ma guurtadda ah (Fixed Asset): waxa ka mid guriga uu dagan yahay mulkilaha maalku haduu leeyahay, qalabka warshadu ku shaqayso, qalabka beerta lagu fallo ama lagu beero, ama sumcada shirkadda.
3. Daymaha quusta ah (bad doubts): waa dayn aanad filayn inay kusoo xaroonayso, haday doonto haba soo xarooto.

4. Maal-galinta wakhtiga dheer (long investment): waa dayn uu Bank u ku amaahinayo, isla markana sannadkiiba ad badh soo celinayso, inta sannadkan moyee inta kale waad iska jaraysaa.
5. Hantidda loo qorsheeyay in lagu bixiyo waqfi ama meelo dan-guud ah.
6. Dahab ka xidhashada logu tallo galay hadii u jiro.
7. Maalka xaraanta ah sida ribadda ama Bonds ka.(إن الله طيب لَّ يقبل إلَّ طيبا رواه مسلم) Usoo noqo haddab qaybihii hantidda aynu u qaybinay, taasoo hore aynu ugu qaybinay laba qaybood.

**b) Hanti Guurto ah (Current Asset)**

Runtii, Ganacsiggu wuu balaadhan yahay, halkana kuma soo koobi karno; mid midna uma soo qaadan karno Ganacisga laga sakaynayo, hase ahatee waxaynu isku dayi doonaa in is guud uga hadalno ama sida ugu macquulsan ee aynu ganacsigeena uga Sakayn lahayn, si hantideenu u noqoto Hanti ilaahay ka raali yahay.
Ilaahay (SWT) iyo Rasuulkiisa Muxamedba (SCW) ay tilmaameen in laga bixiyo sakadda:
﴿ أَنفِقُواْ مِن طَيِّبَاتِ مَا كَسَبْتُمْ ﴾

(Wax ka bixiya wixii aad ka shaqaysateen ee wanaagsanaa)

Qiimahee alaabta lagu Sakaynayaa? Ma qiimaha iibka (price) mise qiimaha ay kugu joogto (cost)?

Qiimaha lagu Sakaynayo alaabta, culimaddu in badan bay isku qabteen, iskuna fikir dhaafeen ama ku kala fikir duwanaadeen, oo sheekhba si u fahmay masaladan,
Hase ahaatee, bal aynu so qaadano seddex fikir ama fahan oo ay culimadu u kala qaaday qiimaynta alaabta marka laga Sakaynayo:

1. In maalka lagaga Sakeeyo qiimaha iibka (price), ee uu wakhtiggan Maalka laga sakaynayo alaabta la siinayo, sida waxaa qaba Abi Cabaas iyo taabiciga wayn ee Jaabir binu Sayd; isagoo soo daliishanaya xadiiskan hoos ku xusan oo sheegaya fikirkan ah in Maalka lagaga sakeeyo qiimaha wakhtigaa sakada laga qadayo la sinayo alaabtaa.

   عن جابر بن زيد أحد رواه أبوعيبده أنه قال قومه بنحومن ثمنه يوم حلت فيه الزكاة ثم أخرج زكاة )[2] (التابعين:

   ( …Abu cubayda wuxu ku yidhi dadkiisii, ku bixiya sakadda maalintaa maalkinu wuxuu qiimo ahan yahay)
2. In maalka lagaga sakeeyo qiimaha uu kugu joogo (cost), ee aad kusoo iibsatay, qawlka waxa qaba Ibnu Raashid iyo culimo kaleba, hase yeeshee wax daliil ah ama dheegashaso ah oo xoogan ama adag ma hayaan

   Marka aynu dhugano, u fiirsano, eegno wakhtigeenan xaadirka, waxa la qaadanaya ama lagu sakaynayaa alaabta qawlka hore sidu qabo, oo ah in lagu qiimeeyo alaabta qiimaha iibka (price) ee markaa la siinayo (wakhtiga sakada).

   **Ganacsiga waxaynu u kala qaybin donaa laba waaxood:**

1. Ganacsi ama Shirkadd baayac-mushtar (Merchandise Company).
2. Ganacsi ama Shirkadd adeeg bixisa (Service Company).

Ganagsigga Baayac-Mushtarigga ah; qofka ganacsaddaha waxaa la gudboon inuu raaco talaabooyinka; ka hor intaanu Maalkiisa ka sakayn:

1. Inuu sannadka gudihiisa ka astaysto ama ka calaamadsado maalin uu xisaabtisa xidho isagoo ku xisaabtamaha Tirsigga Hijriga ama Tirsigga Miilaadiga (Gregorian Calender). Midkood uun.
2. In waxii dayn ah ee uu dadka ku leeyahay ama maqan (Receivables) u kala qaybiyo saddex qaybood:
   i. Dayn gaaban oo xilli dhaw soo hoya karta ama rajo fiican laga qabo.
   ii. Dayn wakhti dheer oo aan la filayn sannad gudihii inay kusoo dhamato.
   iii. Dayn laga quustay, oo aan marnaba inay soo noqoto la filayn, haba soo noqotee.
3. In wixii dayn ah ee isaga lagu leeyahay (Shirkadda ama Ganacsadaha) u kala qaybiyo laba qaybood:
   i. Dayn wakhti gaaban laga doonayo (short liability)
   ii. Dayn wakhti dheer gudihii laga doonayo ama in sannad ka badan laga doonayo (long liability).

Inuu sameeyo liis ah dhamaan alaabta laga Ganacsanayo laguna qiimeeyo qiimaha alaabta lagu iibiyo isla wakhtigaa (price), maaha qiimaha ay ku joogto alaabtu (cost).Waa marka laga hadlayo ganacsigga iibka ah (Merchandise Company).

4. Hadii ganacsiggu yahay ganacsi adeeg ah (Service Company), wixii faa'iido kasoo hadha daymaha ka dib ayaa la sakaynayaa, sida loo sakaynayo hoos baynu ku xusi donaa.

Intaasi markay inoo dhamays tiranto, waxynu u gudbi doonaa sidii aynu u xisaabin lahayan ama aynu u jaleeci lahayn sida, ay sako uga go'i karto Maalka.

Hadda waxaa inoo diyaar ah, dhamaan wixii la odhan jiray WarbixinMaaliyadeed (Financial Report).:

Balance Sheet

Income Statement

Cash Flow

**Balance Sheet,** wuxuux noqoday warbixinta (report) ka kaliya ee ay culimaddu u badan tahay in laga tix-raaco marka la doonayo in laga sakeeyo Shirkadda ama Ganacsigga.

Waayo waxaa si waadix ah ugu cadd; dhamaan Hantidii ay ku shaqaynaysay Shirkadi ama Ganacsi.

Ok, aynu guddo galno xisaabtii haddaba, inoo ogg in xisaabteenii inoo xidhan tahay, waxaynu raacaynaa talaabooyinkan:

1. Isku-gee dhamaan Hangtida Guurta (Current Asset), adoo kasoo qaadanaya Balance Sheet ka.

2. Isku-gee dhamaan Daynta kaa maqan, adoo u kala qadaya Dayn wakhti dhaw iyo Daynta wakhti dheer, adoo Balance Sheet ka tix-raacaya, tusaale Daynta wakhitgga dheer waxa ka mid ah, dayn aad bixisay isla markaana sannad walba qaybi kusoo xarooto.
3. Isku-gee dhamaan Daynta lagugu leeyahay adoo u kala qaday Dayn wakhti dhaw (short tearm liability) iyo Daynta wakhti dheer ah (long-term liability), Daynta wakhtigga dheer waxaa ka mid ah maal-galin uu Bank kusiyay, isla markaana sannad walba aad qayb bixiso.
4. Isku-gee dhamaan wixii kharash ah (General Expences, Miscellaneous Expences)
5. Ogow marka Sakadda laga hadlayo, dhamaan wixii Duugoow logu tallo galay (Depreciation) ah, ee aan la bixin lagama jaro Maalka sakoobaya way ku jiraysaa maalka.
6. Isku-gee Hantidda Guurtadda ah iyo Dhamaan daynta kaa maqan ee wakhtigga dhaw, adoo kusii daraya Daynta kaa maqan wakhtiga dheer inta sannakan soo xaroonaysa waxaad ka jartaa (Minus) Daynta lagugu leeyahahy ee wakhtiga gaaban adoo kasii jaraya (minus) Daynta lagugu leeyahay ee wakhtigga dheer inta sannadkan lagaa doonayo oo kaliya.
7. Daynta kaa maqan waxaynu u kala qaadnay:

a. Dayn gaaban oo xilli dhaw soo hoyan karta ama rajo fiican laga qabo: Maalka sakoobaya waad ku daraysaa (Current Asset).
b. Daynta wakhtiga dheer oo aan la filayn sannad gudihii inay kusoo dhamato: waxaad xisaabsanaysaa inta kuu so xaroon karta sannadkan, kaliya intaas uunbaad ku darsanaysaa Maalka sakoobaya (Current Asset).
c. Dayn laga quustay, oo aan marnaba inay soo noqoto la filayn, haba soo noqotee: daynta noocan ah markayso xarootay haddayba dhacdo, markaas uunbaa muddo hal sano ah la sakaynayaa.

8. Daynta lagugu leeyahayna waxaynu u kala qaadnay:

a. Dayn wakhti gaaban laga doonayo (short liability): waad ka jaraysaa ama ka go'aynaysaa Hanitdda Guurtadda ah (Cureent Asset) ama maalka sakoobaya.
b. Dayn wakhti dheer kadib laga doonayo ama in sannad in ka badan laga doonayo (long liability): tusaale Dayn aad kasoo qaadatay Banggi, oo sannadkiiba aad badh bixiso, isla markaa waxaad ka jaraysaa Hantidda Guurtadda ah (Current Asset) sannadka inta lagaa doonayo,

   Tusaale ahaan: $100,000 ayaad kasoo qaadatay Banggi oo sannadkii aad $10,000 celinayso, Hantidda Guurtadda ah waxaad ka jaraysaa uun $10,000 ee sannadka lagaa doonayo, inta kale waad sakaynaysaa.

9. Markaynu kala jarno (Minus) wixii Hanti guurto ahaa iyo wixii Dayn lagugu lahaa, waxaa inoo soo bixi doona xaddi Hanti ah, hadii ay gaadho hantidaasi 85gram oo Dahab ah nooca 24ka ($4,420) oo ka yimid 85gram X $52 = $4,420 markaa ayaa laga ayaa laga sakaynayaa, iyaddo lagu dhufanayo (times) 2.577% (Gregorian Calendar). Ama 2.5% (Hijri Calendar).

Tusaale: fadlan bal ila eeg si aynu waadix ugu sii fahano, Balance sheet kan, waana mid iska raf ah.

# Balance Sheet

**31-Dec-2013**
**(all numbers in $USD)**

| ASSETS | |
|---|---|
| **Current Assets** | |
| Cash | $25,000 |
| Accounts receivable | 7,000 |
| (less doubtful accounts) | 500 |
| Inventory | 90,000 |
| Temporary investment | 0 |
| Prepaid expenses | 2,200 |
| **Total Current Assets** | $124,700 |
| **Fixed Assets** | |
| Long-term investments | $50,000 |
| Land | 56,000 |
| Buildings | 120,000 |
| (less accumulated depreciation) | 4,500 |
| Plant and equipment | 9,000 |
| (less accumulated depreciation) | 189 |
| Furniture and fixtures | 290 |
| (less accumulated depreciation) | 90 |
| **Total Net Fixed Assets** | $240,069 |
| **TOTAL ASSETS** | $364,769 |

| LIABILITIES | |
|---|---|
| **Current Liabilities** | |
| Accounts payable | $890 |
| Short-term notes | 789 |
| Current portion of long-term notes | 540 |
| Interest payable | 0 |
| Taxes payable | 750 |
| Accrued payroll | 432 |
| **Total Current Liabilities** | $3,401 |
| **Long-term Liabilities** | |
| Mortgage | $0 |
| Other long-term liabilities | 0 |
| **Total Long-Term Liabilities** | |
| **Shareholders' Equity** | |
| Capital stock | $261,368 |
| Retained earnings | 100,000 |
| **Total Shareholders' Equity** | $361,368 |
| **TOTAL LIABILITIES & EQUITY** | $364,769 |

Ka Shaqayn (Solution):

1. Waxaynu haysanaa Hanti guurto ah (Current Asset) = $124,200 (waxaynu ka goynay Daynta inaga magan ee quusta ah $500).
2. Kasoo qaad in maal-galinta wakhtiga dheer ee ah $50,000 (long term investments) ay sannadkan inoo soo noqotay $10,000.
3. Waxaynu haysanaa daynta wakhtigga dhaw (Current Laibility) = $3,401

Ok, isku-gee Hantidda Guurtadda ah (Current Asset) iyo Maali-galinta inta inooga soo noqotay sannadkan, kadibna ka goo (minus) Daynta wakhtiga gaaban (Current Laibility). Wixii soo baxa ayaa la sakaynayaa iyadoo 2.577% ama 2.5% lagu dhufan doono.

Hantidda Guurtadda ah (Current Laibility) = $124,200
Inta maal-galinta wakhtiga dher kasoo noqotay sannadkan = $10,000
Waddartooda $134,200

Ka-goo Daynta wakhtigga gaaban (Curret Laibility) = $3,401
Maalka sakoobaya ee Shirkadda = $130,799.00

- Gregorian Calender (sannadka miilaadigga ah) = $130,799.00 X 2.577% = $3,370.69 Sako ah.
- Hijjri Calendar (sannadka Hijrigga ah) = $130,799.00 X 2.5% = $3,269.9 Sako ah

**Haddaba, hadii ay shirkaddu tahay mid ay dad wada leeyihiin, iyana side ayay ugu kala hagaagaysaa sakadu?**

Saamigga Shirkadda laba nooc baynu u eegi doonaa oo kale ah:
1. Shirkadd ka kooban laba saami (laba qof wada leeyihiin)
2. Shirkadd laba wax ka badani wada leeyihiin.

Waa ta horee, waxaynu sakadaa soo baxday ee sare ku xusan ugu kala qaybin doonaa sidaan: Kasoo qaad inay labada Saamilayn ay u wada leeyihiin ration dan 1 : 2, oo ah mid saddex daloolow laba dalool ayuu leeyahay; midna saddex daloolow dalool ayuu leeyahay.

Soo qaado Sakada sare ee ah Gregorian Calender ($3,370.69):
1. Shirkadd ka kooban laba saami (laba qof wada leeyihiin):

a. ku horee ka labadda dalool leh: $3,370.69 X 2/3 = $2,247.126 Sako ah (intaa aya kusoo hagaagaysa)

b. ka halka dalool leh: $3,370.69 X 1/3 = $1,123.563 Sako ah (intaa aya kusoo hagagaysa)

2. Shirkadd laba wax ka badani wada leeyihiin: waxaynu mala-awaalaynaa in Shirkaddan ay wada leeyihin 35 qof, uu qofba sheer gooniya leeyahay, siday haddaba u kala helayaan sakada ku waa jibtay uguna qaybsamaysaa? Xaddiga sako ee waajibtay waa = $3,370.69 Saamilayduna waa = 35 qof.
Marka hore waxaynu soo saaraynaa halka Saami inta kaga soo hagaagaysa xaddiga Sakadd ah, si aynu qof waliba inta Saami ee uu leeyahay in leeg ugu hagagto Sakaddu.
Xaddiga sako ee waajibtay ayaa loo qaybinayaa (divide) Saamiyadda shirkadda

= $3,370.69 = $96.3
35 Halka Saami waxaa kusoo hagaagaya $96.3, markaa qofkii leh 10 saami sidan ayay sakadu ugu soo hagaagaysaa = 10 X $96.3 = $963 Sako ah ayaa kusoo haggaagaysa.
Qormadda xiggta waxaynu kusoo qaadan doonaa: Qof dayn badan lagu leeyahay Sako ma ku waajibtaa? Hadday ku waajibto siduu u bixinayaa?

## Sidee Loo Sakeeyaa Saamigga Ama Sheerka (Share ka)?

Saami (share): Waa qayb ka mid ah raasal-maal Shirkaddeed.

Saamigga in laga sakeeyo, iyo qaabka looga sakaynayaba, waxaynu cuskan doonaa Fataawihii la qabtay 3dii Aug 1984 oo lagu qabtay Dalka Kuwayd kaas oo ku saabsanaa Sakada.

Kaas oo tilmaamaya in Shirkadda loola dhaqmi karo sidii qof ama shakhsi kaliya marka laga hadlayo ka sakaynta Saamiyadda Shirkadda, marka laga helo qodobaddan:

1. Shirkaddu haddi ay leedahay xeer cadaynaya in ay ka sakayn karto hantidda.
2. Xeerkaa ka sakayntu waa in uu qoraal ahaan ugu jiraa xeerarka Shirkadda.
3. Xeerkaa ka sakaynta waa in Saamilayda guud ee Shirkaddu ansixiyaaan.
4. Qof kasta oo ka mid ahi Shirkadaan u ka raali yahay in Shirkadu maalkooda ka sakayso.

Shirkaddu waxay ka kooban tahay Saamiyo isu taggay, marka laga haddlayo Sakayta Saamiyaddaa, waxaynu u baahan nahay inaynu kala ogaano laba mid:

- In Shirkaddu Saamiyadda Sakadda iyadu ka bixiso.
- In Shirkaddu Saamiyadda Sako aanay ka bixin.

Waa ta horee hadii Shirkadu saamigga ay Sakadda ka bixso; Adiga (shareholder) lagaagama baahna inaad wax sako ah ka bixiso Saamigaga (share), iyadoo laga digayo in ay timaado Hanti kaliya laba jeer laga Sakeeyo, taas oo uu Nabigeenu Muxamed (SCW) inooga diggay si aan qofka loogu xadd gudbin, isagoo yidhi.

)لاثنى في الصدقة).متفق عليه.

Ta labaad, Hadii aanay Shirkaddu Saamiyadda Sako ka bixin iyana laba ayaynu u kala qaadaynaa:

1. Qofka Saamigga leh hadduu ka Ganacsaddo Saamiyada.
2. Qofka Saamigga leh hadii aanu ka Ganacsan Samiga ee uu faa'iidada uun qaato.

Ok, haddaba aynu ku horayno ta kowaad.

1. Qofka Saamigga leh hadduu ka Ganacsaddo Saamiyada:

Saamiggana laba ayaa loo kala jeexayaa:

a) Saamiygga

b) Faa'iiddo sannadeedka Saamigga (Dividend)

Waxaa kale oo xasuusin muddan, Saamiggu guud ahaan wuxuu leeyahay laba qiime, oo kala ah:

- Ka hore waa qiimaha Saamiggu kaga qiimaysan yahay Shirkadda (Book Value, Qiima Daftariga ah),
- Ka labaadna waa qiimaha uu suuqa ka taagan yahay (Qiima Suuqiyah)

Labadaa qiime waxaan uga socdaa, marka Saamigga uu khasaare ku yimaadok waxaa lagu sakaynayaa qiimaha uu Shirkadda ka joogo (Book Value qiima daftariyah),

Haddii uu faa'iido soo saaro Saamiggu sida inta badan dhacda waxaa lagu sakaynayaa qiimaha uu markaa suuqa ka marayo Saamiggu, waayo Saamiggu wuxuu ka mid yahay Ganacsigga xukunka ganacsiggana uu marayaa; iyadoo loosoo daliishanayo xadiiskii Abu Daa'uud: عن سمرة قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم " كان رسول الله صلى الله عليه وسلم يأمرنا أن نخرج الزكاة مما نعدِّه للبيع."

"Rasuulkeenu wuxuu ina farayaa in sakadda lagu bixiyo qiimaha shaygu markaa joogo"
Saamiga sakayntiisa waxaynu u kala jabin karnaa ama u kala qaybin karnaa labada qaybood:

a) Saamiyadda Shirkadaha waa wayn.

b) Saamiyadda Shirkadaha Dhexe iyo Yar-yar.

Aynu ku horayno Saamilayda Shirkadaha waa wayn ha ahaadeen ka ganacsiga sheerarka ama ganacsi kale oo laba qof in ka badan wada leeyihiin.

a) Saamiyadda Shirkadaha waa wayn.

Kasoo qaad in saamilaydu ay ka ganacsadaan saamiga.
Tusaale: waxaad haystaa 20,000 saami Shirkadda (X), 15ka Ramadaana waxaa ku began xisaab sannaddeedkaagii ama xiligii aad ka sakayn jirtay maalkaaga (closing entries).
Suuqa saamilayduna wuxuu ku xidhigay qiimaha samigga maanta ahaa (15kii Ramadaan) $28 sheerkiiba. Sidan ayaa loo sakaynaya markaa.
Qiimaha Saamiga maalintaa X Xaddiga Saamiga Hantiilaha X 2.5% (Hijri Calander) ama 2.577% (Gregorian Calander).

$28 X 20,000 X 2.577% = $14,431.2 (Gregorian calendar)

Ama
$28 X 20,000 X 2.5% = $14,000 (Hijri calendar).

b) Saamiyadda Shirkadaha Dhexe iyo Yar-yar.

Waxaa la Sakaynayaa Saamigga iyo Faa'iidada labaddaba si wadda jir ah.
Tusaale: Hadii aad Shirkad aad ku leedahay Saami (share) xadigiisu yahay $15,000(shan iyo toban kun oo dollar), Sannadkana uu soo saaray faa'iido leeg 40% , sako maxaa lagugu leeyahay?

Ugu horayn waxaad soo saartaa xaddiga faa'iidada Saamiggu soo saaray, marka labaad isku dar Saamiggagii iyo faa'iido sanadeedki uu soo saaray, ka dibna si wada jir ah uga sakee adoo ka sakaynaya 2.577% ama 2.5% iyodoo faah faahsan hoos ka eeg:
Saamigu waa = $15,000.

Faa'iido sanadeedku waa = 40% ($15,000 X 40% ) = $6,000 (Lix kun oo dollar) oo faa'iido ah.
Maalka Sakoobayaa waa = $15,000 + $6,000 = $21,000
= $21,000 X 2.577% = $541.17 (Gregorian calendar)
Ama = $21,000 X 2.5% = $525 (Hijri calendar).

2. Qofka Saamigga leh hadii aanu ka Ganacsan Samiga ee uu faa'iidada uun qaato:
Saamiga waxaynu u kala qaadnay laba:

- Saamigii
- Faa'iido sanadeedka Saamigga (dividend)

Marka la joogo Saamilayda aan ka ganacsan saamigooda, waxaa la ga sakaynayaa faa'iido sanadeedka oo kaliya, iyadoo aan la sakaynayn lafaha Saamigga, waxaana la xisaabinayaa ama loo aqoonsanayaa in uu yahay Fixed Asset (Hanti Maguurto ah), fixed assetkan kuma waajibto sako, sidaynu hore usoo sheegnay.
Tusaale: tusaalihii hore inagoo sii raacayna.
Faa'iido sanadeedku waa = 40% ($15,000 X 40% ) = $6,000 (Lix kun oo dollar) oo faa'iido ah.
Maalka Sakoobayaa waa = $6,000
= $6,000 X 2.577% = $154.62.17 (Gregorian calendar).
Ama = $6,000 X 2.5% = $150 (Hijri calendar).

FG: Haddi ay jiraan faa'iido sannadeed aan wali Shirkaddu u qaybin Saamilayda (Shareholders) iyaddana si toos ah ayaa loo sakaynayaa

## Sakada xoolaha

Xoolaha sakada laga bixinaayo waxa weeye afarta meesi ee la dhaqdo  oo kala ah geela ,loda iyo Ariga oo kula baxa ido iyo riyo lakiin hal qeyb  isku ah

## Geela

Waxa ayna ku waajibtaa dhamaan noocyada geela ha ahaato mid leh hal tuur "Kurus"  ama labo tuur  Hadday ka bataan tiradooda shan waa sidan soo socota

| **Qaabka sakada looga bixinaayo geela** | | |
|---|---|---|
| **Tirsi** | **Tirada xoolaha** | **Sakada la bixinaayo** |
| 1 | 5 – 9  Neef | Neef adhi ah |
| 2 | 10  – 14 Neef | Labo Neef oo adhi ah |
| 3 | 15 – 19 Neef | Sadex Neef oo adhi ah |
| 4 | 20 – 24 Neef | Afar Neef oo adhi ah |
| 5 | 25 –  35 Neef | Nirig sanad jir ah |
| 6 | 36  – 45 Neef | Nirig labo jir ah |
| 7 | 46 – 60 Neef | Nirig sadex jir ah |
| 8 | 61 – 75 Neef | Nirig afar jir ah |
| 9 | 76  – 94 Neef | Labo Nirgood oo labo jir ah |
| 10 | 91 – 120 Neef | Labo nirgood oo sadex jir ah |
| 11 | 121 – 129 Neef | Sadex nirgood oo labo jir ah |

**Lo'da**

Waxayna ku waajibtaa dhamaan noocyada lo'da sida jaamusyada iyo qeyrkood Haday ka bataan tiradeeda soddon  waana sidan

| **Qaabka sakada looga bixinaayo Lo'da** | | |
|---|---|---|
| Tirsi | Tirada xoolaha | Sakada la bixinaayo |
| 1 | 30  – 39  Neef | Wayl |
| 2 | 40 – 59 Neef | Wayl  laba jir ah |
| 3 | 60 – 69 Neef | Labo waylood  oo sanad jir ah |
| 4 | 70 – 79 Neef | Dibi sanad jir ah iyo wayl labo jir ah |
| 5 | 80 –89 Neef | Labo waylood |

**Ariga**

sakada waxay ku waajibtay nooc uu yahay ido iyo riyaba haday ka bataan  tiradooda afartan waana sidan

| Qaabka sakada looga bixinaayo Ariga | | |
|---|---|---|
| Tirsi | Tirada xoolaha | Sakada la bixinaayo |
| 1 | 40 – 120 Neef | Neef ari ah |
| 2 | 121 – 200 Neef | Laba Neef oo ari ah |
| 3 | 201 – 391 Neef | Sadex Neef oo ari ah |
| 4 | 400 – 499 Neef | Afar Nee foo ari ah |

## Tixraac

Imuslimguide.com

www.somalitalk .com

Baro Habdhaqanka Noloshada App

Kitaabka abuu shujaac

Jamaacatul khayr page

Muxaadarooyin youtube



FAARAH AHMED ABDI

Bismillaah dhiganahan kooban waxa uu ka hadlaya sakada , qeybaheeda iyo habka ama qaabka looga sakeeyo maalka uu ilaahy siiyey qofka waana muhiim qofkasta inuu yaqaan si uu uga sakayn lahaa xoolihi si uu u guto waajibkaas.

Dhigahan kooban waxad awooda inaad akhrido marar badan si uu ugu xasilo maskaxdaada mowduucana aad waxbadan uga fahamto

Sidoo kale waad daabacan kartaa oo qoraha dhiganaha kuma xirin xujo balse ujeedada waa in laga faaideysto oo cidii uu gaaro cilmi ama xog ka maqnayd kusoo kordhiyo ama xogta la xiriirta mowduuca ciwaanka u ah buuga ee sakada usoo uruuriyo isla markaana ugu soo koobo Hal meel.

Rabbiyow adaa caadiloo ,oo aamaan mudane

Adigaa Adoonkaaga wacan , kheyr abaalmarine

Iigu deeq albaabada jannada, waan ku aaminaye

Eebbow baryada iga ajiib , caabud ban ahaye

AAAMIN

Wasallaamu calaykum waraxmatu llaahi wabarakaat

DHAMAAD